# OGEYSIISKA DHAQANNADA ASTURNAANTA

Taariikhda dhaqangalka: 1 Bishii Afaraad, 2003

**Ogeysiiskan wuxu sharraxayaa sida macluumaadkaaga caafimaadka loo isticmaali karo iyo sida aad u heli karto macluumaadkaas. Fadlan u eeg si taxadar leh.**

*Hadii aad qabto su'aal ku saabsan Ogeysiiskan Dhaqanka Asturnaanta, fadlan la xidhiidh Maamulaha Asturnaanta ee Qaybta Caafimaadka Jaamacada Ohio State oo laga helayo (614) 293-4477 ama Maamulaha Asturnaanta Bukaanka Dhakhtarka ee Jaamacada Ohio State oo laga wacayo (614) 784-7806.*

**Dib u eegista waxaa Ansixiyey Gudiga farsamada HIPAA Bishii Shanaad, 2008**

## Ogeysiiskan

Kani waa Ogeysiiska Wada jirka ah ee Dhaqanka Asturnaanta ("ogeysiis"). Ogeysiiskani wuxuu khuseeyaa ururada leh Adeeg Caafimaad oo habaysan:

- Jaamacada Ohio State State Univeristy;
- Cisbitaalka Arthur G. James Cancer iyo Mac-hadka Daraasaadka Richard J. Solove;
- OSU & Harding Behavioral Healthcare and Medicine;
- The Ohio State University Hospitals East; iyo
- The Ohio State University Physicians, Inc. xafiiska dhakhtarka.

Ogeysiiskan dartiis, ururradan oo la isku wada daray waxaa la odhanayaa Habka Caafimaadka Jaamacada ("Sistamka caafimaadka" ama "innaga" ama "annaga"). Ururada ka qayb qaadanaya Habaynta Daryeelka Caafimaadka ayaa ka qaybqaadanaya ujeedada bixinta ogeysiiskan. Urruradani waa daryeelayaal caafimaad oo gaar ah. Urur kastaa isagaa gaarkiisa uga masuul ah hawlihiisa, oo ay ka mid tahay raacista shuruucda asturnaanta iyo adeegyada ay bixiso. Ururadani sinnaba uma bixinayaan adeegyo daryeel caafimaad si wada jir ah ama iyagoo is metalaya.

Ogeysiiskani wuxuu taabanayaa:

- Macallimiinta Habka caafimaadka iyo shaqaalaha caafimaadka; iyo
- Dhammaan shaqaalaha, ardayda, iyo dadka iskaa wax u qabso ku shaqeeya ee ka qaybqaadanaya adeegyada Nidaamka Caafimaadka.

## Ballantayada ku Saabsan Xogta caafimaadka

Waxaanu fahansanahay in xogtaada caafimaadku yahay mid gaar ama shakhsi ah. Marka aad hesho daryeel caafimaad, waxaad macluumaad naftaada ku saaabsan siinaysaa dhakhaatiirta, kalkaalisooyinka, iyo kuwa kale ee ku daryeela. Macluumaadka aad na siiso waxaanu u adeegsanaynaa inaan ku abuurno diiwaan ku saaabsan naftaada iyo adeegyada aad heshay. Waxaan u baahan nahay diiwaankan si aan kuu siinno daryeel tayo leh iyo inaad adeecdo shuruucda. Diiwaankani waa warbixin caafimaad oo gaar ama shakhsi ah oo uu ilaalinayo sharcigu waxaana la yidhaa "macluumaadka caafimaadka la xafiday" Macluumaadkan caafimaadka ee la xafiday waxaannu ku haynaa waraaq ahaan ama kombiyuuter elektaroonik ahaan. Waxaannu ku dadaalaynaa in aannu xogtaada caafimaadka xafidno.

Sharci ahaan, waa in aannu:

- hubinno in xogtaada caafimaadka loo illaaliyo si gaar ah;
- siino ogeysiiskan ah waajibkayaga qaanuun iyo arrimaha qofka u gaarka ah; iyo
- raacno/fullinno shuruudaha ogeysiiska kaasoo immika ah dhaqangal.

Ogeysiiskani wuxuu kuu sheegi doonaa wax ku saabsan:

- hababka laga yaabo inaannu isticmaalno si oo aannu u wadaagno xogtaada caafimaadka;
- xuquuqdaada; iyo
- masuuliyadahaaga ku saabsan isticmaalka iyo wadaaga xogta caafimaadka.

## Sida Laga Yaabo Inaan U Isticmaalno OO U Wadaagno Xogtaada Caafimaadka

Waxaanu u isticmaalaynaa ama u wadaagaynaa xogtaada caafimaad dariiqooyin go’an. Tani waxay noo ogolaanaysaa inaan si fiican uga hadalno baahiyahaaga daryeelka caafimaad ee goobta sistamka caafimaadka. Waxaanu kuu sharaxi doonaa sida iyo marka aanu isticmaalayno una wadaagayno xogtaada caafimaad. Ma awoodno inaanu sheegno (taxno) xaalad kasta oo gaar ah oo aanu u isticmaalo ama u wadaagno xogtaada caafimaad, laakiin xaalad kastaa waxay soo hoos galaysaa xaaladaha asaasiga ah ee hoos ku qoran.

**Daaweyn Darteed.**
Waxaa laga yaabaa inaan isticmaalno ama wadaagno xogtaada caafimaadka. Waxaa laga yaabaa inaan dhakhaatiirta, kalkaaliyayaasha, farsamayaqaannada, ardayda layliska ah, iyo dadka kale ee kaa caawiya daryeelka aannu la wadaagno xogtaada caafimaadka. Waaxo ama ururo oo ka tirsan Hababka Caafimaadka ayaa laga yaabaa inay wadaagaan xogtaada caafimaadka si la isku duwo baahiyaha adeega sida qorista dawooyinka, shaybaadhka iyo raajada (X-ray). Waxaa laga yaabaa inaan xogtaada caafimaadka la wadaagno adeeg bixiyayaasha ka baxsan sistamka ama habka caafimaadka si laguu daweeyo. Tusaale ahaan, dhakhtar kaa daawaynaya lug ku jabtay ayaa laga yaabaa inuu doonayo inuu ogaado inaad leedahay sonkor maxaa yeelay cudurka sonkorowgu wuxuu dib u dhigaa inta uu nabarku ku bogsado. Waxaa intaa sii dheer waxaa laga yaabaa in dhakhtarku ubaahan karo in uu u sheego qof ku takhasusay nafaqada cuntada haddii aad qabto Sonkor si aan kuugu qabanqaabinno cunto kugu habboon.

**Kharash Bixin.**
Waxa laga yaabaa inaan u isticmaallo una wadaagno xogtaada caafimaad si la noo siiyo kharashka daryeelkaaga. Waxaa laga yaabaa inaan xogtaada caafimaadka la wadaagno daryeele bixiye kale si iyagana lacag loogu siiyo adeeggooda. Waxa laga yaabaa inaan ka qaadanno, iyo inaan la wadaagno macluumaadka daryeel bixiyayaal kale, shirkadaha caymiska, adiga, ama qof saddexaad. Tusaale ahaan, waxa laga yaabaa inaan u baahanno inaan siinno qorshahaaga caafimaad xog ku saabsan daryeel aad ka heshay nidaamka caafimaadka si qorshahaaga caafimaad uu noo siiyo lacagta ama si ay adiga kuugu celiyaan lacag aad ku bixisay daryeel aanu bixinay. Waxa laga yaabaa inaan u sheegno qorshahaaga caafimaad ee ku saabsan daaweyn aad heli doontid si laguugu sii ogolaado ama go’aan looga gaaro in qorshahaagu daboolayo daaweynta iyo in kale. Waxa kale oo laga yaabaa inaan la wadaagno xogtaada si aan u fududayno kharash siinta daryeel bixiye kale oo ka qayb qaatay daryeelkaaga.

**Hawlaha Caafimaadka.**
Waxa laga yaabaa inaan u isticmaalo ama u wadaagno xogtaada caafimaad hawlo la xiriira nidaamka caafimaad. Isticmaalidan iyo sheegidani waxay laga-maarmaan u tahay socod siinta nidaamka caafimaadka iyo in la hubiyo in dhamaan bukaankayagu ay helaan daryeel ta’yo leh. Tusaale ahaan, waxaa laga yaabaa inaan kula soo xidhiidhno si aan go’aan uga gaadhno heerka qanacsanaantaada adeegayaga, ama si aan u aragno sida aad noqotay kadib markaad ku noqotay guriga. Waxa laga yaabaa inaan u isticmaallo xogta caafimaadka inaan dib u eegno sida aan wax u dawaynno iyo adeegyadayada iyo si aan u qiimaynno wax qabadka shaqaalahayaga ee ku saabsan daryeelkaaga. Waxa laga yaabaa inaan isku darnno xogta caafimaad ee bukaannada nidaamyo caafimaad oo badan si aannu go’aan uga gaarno in adeegyada ay tahay inay bixiyaan nidaamyada caafimaad, adeegyada aan loo baahnayn, iyo in hab daaweyn cusubi ay tahay mid waxtar leh iyo in kale. Waxaa laga yaabaa inaan xogta caafimaadka la wadaagno dhakhaatiirta, kalkaaliyayaasha, farsama yaqaanada, ardayda layliska ah, iyo dadka kale caawiya daryeelkaaga ujeedooyin la xidhiidha waxbarasho iyo gorfayn. Waxaa laga yaabaa inaan isku darno xogta caafimaadka ee aannu haynno iyo kuwo sistamyada ama hababka kale ee caafimaadka si aan u ogaanno meelaha aan horumarka aan ka samayn karno ee daryeelka iyo adeegyada aan fidino. Marka aan la wadaagno xogta caafimaadka sistamyada ama hababka caafimaad ee kale, isbarbardhiggan waxaannu meesha ka saarnaa macluumaadka loo isticmaali karo in lagugu aqoonsado si ay dadyowga kalena u daraasayn karaan daryeelka caafimaadka iyo fulinta daryeelka caafimaadka iyada oo aan la ogaan cida aad tahay.

**Ballan Xasuusiyayaal.**
Waxaa laga yaabaa inaannu isticmaalno oo wadaagno xogta caafimaadka si aan kuula soo xidhiidhno oo aan kuu xasuusino ballamaha daryeelka caafimaad ee sistamka ama habka caafimaadka gudihiisa. Haddii aadan rabin inaad hesho ballan xasuusiyaha; ama aad rabtid in lagula soo xariiro telefoon gaar ah, hubi in aad u sheegto wakiilka adeegga kuu diiwaan galinaya.

**Faa’iidooyin iyo Adeegyo la Xiriira Caafimaadka.**
Waxaa laga yaabaa inaan u isticmaalno oo wadaagno xogta caafimaadka si aan kuugu sheegno noocyada daawaynta. Waxaa kale oo laga yaabaa inaan u isticmaalno oo wadaagno macluumaadka caafimaadka inaan kuu sheegno xuquuqaha iyo adeegyada caafimaadka la xidhiidha ee laga yaabo inay ku xiiso geliyaan.

**Hawlo lacag ururin.**
Waxaa laga yaabaa inaan xogta caafimaadka u isticmaalno inaan kula soo xidhiidhno si aan qaadhaan ugu ururino sistamka ama habka caafimaadka. Qaaraan ururintu waxay sistamka ama habka caafimaadka ka caawinaysaa inuu fuliyo ujeedoo-yinka daryeelka

bukaanka, waxbarista iyo cilmi baadhista. Waxaa laga yaabaa inaan siinno shaqaalaha Xafiiska Horumarinta Sistamka ama habka Caafimaadka macluumaadka la xidhiidha astaamahaaga (sida magaca, ciwaanka, iyo telefoonkaaga oo ay ku jirto taariikhihii aad heshay daawaynta ama adeegyada. Hadii aadan doonayn in lagula soo xiriiro qaaraan ururrin dartii, waa inaad u sheegtaa, qoraal ahaan, maamulaha sare ee Xarunta horumarinta caafimaadka (Medical Center Development & Alumni Affairs) ee cinwaanka soo socda: 205 Meiling Hall, 370 W. Ninth Avenue, Columbus, OH 43210-1238.

**Tusiyaha Xarunta.**
Haddii lagu dhigo cisbitaalka, waxaa laga yaabaa inaan ku darnno:

- magaca;
- meesha uu cisbitaalku ku yaallo; iyo
- diinta aad ku taxan tahay ee diiwaanka (miiska warbixinta) goobtaas.

Waxaanu leennahay diiwaan si wadaadka, asxaabta iyo ehelladu kuu soo booqan karaan. Macluumaadka tusiyaha marka laga reebo diinta aad haysato waxaa kaliya oo la siiyaa dadka magacaaga weydiiya. Laakiin, diinta aad haysato waxaa kaliya oo lasiin karaa xubin ka mid ah wadaadada diinta aad haysato; sida wadaad kiristaan ah ama mid yahuud ah xitaa haddii ayan/uusan magacaaga weydiin (aqoon) xaq baad u leedahay inaad diiddo in macluumaadkaan lagu daro tusiyaha xarunta. Si lagaaga tiro tusiyaha la xariir diiwaangaliye kasta ama xafiiska aqbala bukaanka.

**Dadka ku Lugta leh Daryeelkaaga ama Kharash Bixinta Daryeelkaaga.**
Waxa laga yaabaa inaan u sheegno xog caafimaad oo kugu saabsan qof ka mid ah qoyskaaga ama qof kale oo la magacaabay oo ku lug leh daryeelkaaga caafimaad. Waxa kale oo laga yaabaa inaan siinno xogta qof kaa caawinaya bixinta kharashka daryeelkaaga. Tusaale ahaan, waxa laga yaabaa inaan u baahanno in qofka kuu yimaada si uu kuu qaado kadib ballanta in aan u sheegno waxay isagu/iyadu ay u baahan karaan si ay kuu caawiyaan marka aad guriga gaartid. Waxaa laga yabaa inaan isticmaallo ama aan wadaagno macluumaad kugu saabsan si aan u ogeysiinno qoyskaaga ama qofka ka ma’suulka ah daryeelkaaga meesha aad joogto iyo xaaladaada. Marka lagu daro, waxa laga yaabaa inaan u sheegno xogta caafimaad hay’ad wax caawisa oo ku dhex jirta kaalmaynta meel masiibo ka dhacday si qoyskaaga loogu sheego xaaladaadu siday tahay iyo meesha aad joogto. Tusaale; haddii lagu seexiyo qaybta cisbitaalka gaargaarka degdegga (emergency) qoyskaadana uusan ogeyn meelaad jirto waxaa laga yaabaa inaan la xariirno una sheegno. Haddii aad ka mid noqoto masiibo dhacday sida ufo/dabayl xoog badan ama shil; waxaa laga yaabaa in aan u soo hagno hay’ada gargaarka masiibooyinka gurigaada si ay qoyskaaga ula soo xariiraan.

Xaaladaha Gaarka ah:
*Isticmaallo iyo sheegid dheeraad ah taasoo ogolaansho ama fursad lagu ogolaanayo ama lagu diidayo aan loo baahnayn iyadoo la tixraacayo sharciga masuuliyada caymiska caafimaadka ee "Health Insurance Portability and Accountability Act (HIPAA)".*

**Cilmi-baaris.**
Cilmi-baaristu waa mid ka mid ah ujeedooyinka sistamka ama habka caafimaadka. Cilmi-baarista waxay caawin kartaa helista daawooyinka cudurada. Cilmi-baaristu waxay caawin kartaa adiga iyo dad kale oo badan. Waxaa laga yaabaa inaa hesho fursad aad qayb kaga noqonayso cilmi-baarista Sistamka ama habka Caafimaadka. Daruufo gaar ah dartood, waxa laga yaabaa inaan isticmaallo ama aan sheegno xog caafimaad oo kugu saabsan cilmi-baaris darteed, ama waxa laga yaabaa inaan kula soo xiriirno si aan kuugu sheegno mashruucyo cilmi-baaris laga yaabo in aad u qalantid. Dhammaan mashruucyada cilmi-baaristu waxay u baahan yihiin ogolaanhso gaar ah ka hor inta aan la isticmaalin ama aan la sheegin xogta caafimaadka. Waxa kale oo laga yaabaa in aan u sheegno xogtaada caafimaad dad diyaarinaya inay sameeyaan mashruuc cilmi-baaris ah. Waxa laga yaabaa inay doon-doonayaan bukaan leh baahi caafimaad oo gaar ah ama xog gaar ah. Xogta caafimaad ee ay eegaan waxa lagu ilaalin doonaa meel sir ah. Had iyo gaar, waxaad u baahnaan doontaa inaad bixiso ogolaansho ka hor inta aanan lala wadaagin xogtaada cid kale si ay ugu isticmaalaan cilmi-baaris. Hadii xogtaada la isticmaalo, cilmi-baaruhu waa inuu ku ilaaliyaa xogtaada meel amaana oo sirna ah.

**Sida uu qaanuunku doonayo.**
Waannu sheegi doonnaa xogtaada caafimaad marka qaanuunka dawladda federalka ah iyo Gobolka ama sharciyada hoose ee degaanka uu u baahdo inaan sidaa yeelno.

**Ka Hortagida Halis Khatar ku ah caafimaadka iyo amaanka.**
Waxaa laga yaabaa inaan isticmaalnno oo sheegno xogta caafimaadka ee adiga kugu saabsan marka ay lagama maarmaan tahay in laga hortago halis:

- badbaadsanaanta iyo caafimaadkaaga;
- caafimaadka iyo badbaadsanaanta dadwaynaha; ama
- badbaadsanaanta iyo caafimaadka qof kale.

**Ku Tabarrucida Xubnnaha iyo Nudaha.**
Waxa laga yaabaa inaan siino xogta caafimaad hay’adaha ku shaqada leh helida xubnaha, nudaha iyo indhaha markay tahay daruuri, si loo fududeeyo tabarucida iyo talaalida xubnaha, nudaha, iyo indhaha. Hay’adahani waxa laga yaabaa inay eegaan jadwalka dadka dhintay si ay go’aan uga gaaraan u hogaansanaanta qaanuunka fedaraalka iyo kan gobolka ee la xiriira tabarucida, helida, iyo dalabada talaalida.

**Mag-dhowga Shaqaalaha.**
Waxa laga yaabaa in aan siinno xog caafimaad Mag-dhowga Shaqaalaha (Workers' Compensation), sida uu dalbanayo qaanuunka Mag-dhowga Shaqaaluhu. Barnaamijkani wuxuu siiyaa mag-dhow dhaawacyada ama xanuunada ku dhaca shaqaalaha.

**Wixii Khatar ku ah Caafimaadka Guud.**
Sida sharcigu dhigayo, waxaa laga yaabaa inaan u sheegno xogta caafimaadka masuuliyiinta caafimaadka si:

- ay uga hortagaan ama u kantaroolaan cudur, dhaawac ama curyaanimo;
- uga warbixiyaan arinta badbaadsanaanta qalab caafimaad iyo xaaladaha xunxun ee Maamulka Cuntooyinka iyo Daawooyinka ee Federaalka; iyo
- ka warbixiyaan cudur iyo caabuq loo baylaho.

**Dhibanayaasha xadgudubka, kuwa la dayaco, ama rabshadaha.**
Waxa laga yaabaa inaanu u sheegno xog caafimaad oo gaar ah hay’adaha dawlada ee qaanuun ahaan awooda u leh inay helaan war-bixinaha xad-gudubka, daryeel la’aan, ama rabshad hadii aannu aaminno inaa tahay dhibbane.

**Wakaaladaha ku shaqada leh Gafafka caafimaadka.**
Waxaa laga yaabaa inaan xogtaada caafimaad u sheegno hay’adaha caafimaadka kormeera wixii la xidhiidha hawlo sharcigu ogol yahay. Tusaale ahaan, hawlahan waxaa ka mid noqon karta hantidhowr, baadhis, fiirsasho, ama laysan/shati.

**Tallaabooyinka sharciga ee maxkamadaha iyo maamullada.**
Waxa laga yaabaa inaan sheegno xogta caafimaad hadii ay dhacdo tallaabo sharciya oo ah mid maamul ama maxkamadeed, sida ka jawaabid amar maxkamadeed.

**Fulinta Qaanuunka.**
Waxaa laga yaabaa inaan xogtaada caafimaadka u sheegno saraakiisha hay’adaha sharciga haddii sharcigu u baahdo.

**Xogta caafimaadka qofka geeriyooday.**
Waxaa laga yaaba inaan xogta caafimaadka u sheegno sarkaalka maydka baadha, baadhe caafimaad, ama agaasime aas sida lagama maarmaanka ah si ay u gutaan waajibaadkooda.

**Qaybaha Dawlada ee Gaarka ah.**
Waxa laga yaabaa inaannu u sheegno xogtaada caafimaad saraakiisha fadaraalka ee awooda u leh nabad-galyada guud darteed, iyo sir-doonka, milatariga, dhaq-dhaqaaqyada hawl-gabka sida uu dalbanayo qaanuunku.

## Waxyaabaha loo isticmaalo xogta caafimaadka ee u baahan ogolaanshahaaga qoraalka ah

Xaaladaha kale oo dhan (xaaladaha aan ahayn daaweynta, kharash bixinta, hawlaha la xiriira nidaamka caafimaadka ama xaalado gaar ah, sida aanu kor ku soo sheegnay), waxa kaliya oo aanu xog kula wadaagi karnaa hadii aad noo keento ogolaansho qoran. Waad la noqon kartaa ogolaanshahaaga, qoraal ahaan, mar walba. Hadii aad la noqoto ogolaanshahaaga, intaa ka dib isticmaali maynno ama sheegi maynno xogtaada caafimaad sababaha aad ku sheegtay qoraalkaaga sharciyaysan, marka laga reebo wixii xog ah ee aanu isticmaalay ama sheegnay intaa ka hor.

## Xaqa aad u Leedahay Macluumaadkaaga Caafimaadka

Jiritaanka qaabeed ee xogtaada caafimaadka iyo adeega biilashu waa diwaan ganacsi waana hantida sistamka ama habka caafimaadka. Xogta caafimaadka ee ku jirta diiwaanadan waa xogtaada caafimaad. Waxaad leedahay xuquuqahan soo socda ee ku saabsan xogtaada caafimaad.

**Xuquuqda ah inaad dib u eegto iyo inaad nuqul ka qaadato.**
Waxaad xaq u laeedahay inaad eegto iyo inaad nuqul ka qaadato xogta caafimaad ee loo isticmaalay in go’aan lagu qaato si laguu daryeelo. Inta badan, xogtan caafimaad waxaa ka mid ah macluumaadka aannu u isticmaalnno inaanu ku samaynno go’aanno ku aaddan daryeelkaaga caafimaad iyo diiwaanadaada caafimad, laakiin ka mid maaha:

- qoraalo ku saabsan daaweynta cudurada maskaxda;
- xogta loo soo ururiyey si loogu isticmaalo ama loo sameeyey in lagu ogaado talaabooyin sharciya, maamula, madaniya ama fal-danbiyeed ah,
- tijaabo lagu sameeyay shaybaar kasoo hoos imanaya qodabka ka horumarinta kiliinigyada iyo shaybaarada ee 1988; ama
- macluumaad kale oo aa naanu isticmaalin si aanu u samayno go’aan ku saabsan daryeelkaaga caafimaadka.

Waa inaad codsi aad ku dalbanayso xogta caafimaadka u soo gudbisaa Agaasimaha Maamulka Macluumaadka Caafimaadka ama maareeyaha xafiiska/kiliiniga kuu adeega.

*ka sii socda*

*ka sii socda bogga 4*

Hadii aad codsato nuqul ah macluumaadkaaga, waxa laga yaabaa inaa ku xisaabinno kharashka koobiyaynta, boosto ku dirida ama wixii ee la xiriira codsigaaga.

**Xaqa aad u Leedahay inaad ka Qaadato Rafacaan hadii laguu diido macluumaadka Caafimaaka.**
Xaq baad u leedahay inaad hesho macluumaadkaaga caafimaad. Waxaa jira xad ay leedahay xuquuqdaasi. Waxaa laga yaabaa in adeeg bixiyaha caafimaadku inuu go'aansado sababo la xidhiidha darteed in xogtaada oo laguu sheegaa ay u badan tahay inay kugu yeelato saamayn xun. Haddii tani dhacdo, waxaa laga yaabaa inaad doorato adeege caafimaad oo kale. Kadib waxaanu xogtaada caafimaad siin doonaa adeegaha caafimaaad ee aad doorato.

**Xaqa badalaada.**
Haddii aad dareento in xogta caafimaad ee aannu kaa haynaa ay qalad tahay ama uu macluumaad ka maqan yahay, kadib waxaa laga yaabaa inaad na waydiisato inaan bedelnno xogta caafimaadka. Waxaad xaq u leedahay inaad codsato bedel ilaa inta aannu haynno xogta caafimaadka. Waxaa laga yaabaa inaan ku diidno xuquuqdaada wax ka bedelka xogta:

- aan qaybta ka ahayn xogta caafimaadka ee laguu ogolaan doono inaad aragto oo aad koobi ka hesho; ama
- aannu aaminsannahay inuu yahay sax, dhamays tiran yahayna.

inaad codsi u soo gudbiso Agaasimaha Maamulka Xogta Caafimaadka ama maamulaha xafiiska/kiliiniga aad adeega ka hesho. Codsigaagu waa inuu noqdaa qoraal waana inay ku jirtaa sabab taageeraysa codsigaaga.

**Xaqaaga aad ku ogaanayso Liiska Macluumaadkaaga la Sheegay.**
Xaq baad u leedahay inaad dalbato liiska wixii la sheegay. Kani waa liiska xogta caafimaadka qaar ka mid ah waxyaabihii la sheegay xaalado gaar ah. Waxyaabahan la sheegay lama xidhiidhaan daawaynta, kharashka, ama hawlaha daryeelka caafimaad. Marka aanu waxyaabahan sheegno, la noogama baahna inaan helno ogolaansho ka hor inta aanaan cid kale u sheegin xogtaada caafimaadka. Waxaa laga yaabaa inaad codsi qoraal ah oo aad ku dalbanasyo lifaaqyada xisaabaadka u soo gudbiso Agaasimaha Maamulka Xogta Caafimaadka ama maamulaha xafiiska/kiliiniga aad adeega ka hesho. Noo sheeg jadwalka taariikhda waxaad u baahan tahay inaad eegto. Waxaa laga yaabaa in waqtigu noqdo macluumaadka ilaa lix sano waana inuu ka bilaabmaa 14-ka Bishii Afaraad, 2003.

Waa lacag la'aan liiska ugu horreeya ee aad codsataa oo ah mudo 12-bilood. Waxa laga yaabaa inay kugu kacdo kharash hadii lagu siiyo liistooyin dheeraad ah. Waxaannu kuu sheegi doonnaa kharash kasta oo ay ku kacasyo. Waxa laga yaabaa inaad ka noqoto ama wax ka badasho codsigaaga ka hor inta aadan wax kharash ah gelin.

**Xaqaaqa Inaad Codsato Xadayn.**
Xaqbaad u leedahay inaad codsato in la xadeeyo ama la joojiyo xogtaada caafimaad ee aannu u isticmaallo ama sheegno daaweyn darteed, kharash bixin ama hawlaha la xiriira daryeelka caafimaad. Lanoogama baahna inaan ogolaano codsigaaga. Haddii aan kugu raacno codsigaaga, kadib waxaannu fulin doonnaa codsigaaga haddii aannu xogtaada caafimaadka loogu baahan in daawayn degdeg ah lagu sameeyo. Waa inaad codsigaaga xadidaad kasta oo suurtogal ah qoraal ahaan ugu gudbisaa Agaasimaha Maamulka Xogta Caafimaadka ama maamulaha xafiiska/kiliiniga aad adeega ka hesho. Codsigaaga waa inaad noogu sheegtaa:

- xogta caafimaadka aad doonayso inaad xannibtaa midda ay tahay;
- inaad doonayso inaad xannibto isticmaalkayaga, sheegista ama labadaba; iyo
- cidda aad doonayso inaad ka xannibto (tusaale ahaan, u sheegista xaaskaaga/saygaaga).

**Xaqaaqa Inaad Codsato xiriir Sir ah.**
Xaqbaad u leedahay inaad codsato inaan kula soo xiriirno anaga oo ka hadlayna arimo la xiriira caafimaadka dariiqooyin gaar ah ama meelo go'an. Tusaale ahaan, waxaadna waydiinsan kartaa inaan kugu la soo xiriirno shaqada oo kaliya ama boosta. Waa inaad codsigaaga qoraalka ah si qarsoodi ah ugu gudbisaa Agaasimaha Maamulka Xogta Caafimaadka ama maamulaha xafiiska/kiliiniga aad adeega ka hesho. Kuma waydiin doono sababta codsigaaga. Waanu soo dhawaynay naa dhamaan codsiyada macquulka ah. Codsigaagu waa inuu qeexaa sida iyo meesha aad jeceshahay in lagaala soo xiriiro. Tusaale ahaan, hadii aad jeceshahay in lagula soo xiriiro telefoon, hubi inaad bixiso telefoon lumberka ku haboon.

**Xaqaaqa inaad Hesho Nuqul ah Ogeysiiskan.**
Xaqbaad u leedahay inaad hesho nuqul ah ogeysiikan oo warqad ah. Waadna waydiinkartaa nuqul ah ogeysiiskan wakhti kasta. Hadii xataa aad ogolaato inaad ku hesho ogeysiiskan elegtarooni ahaan, weli waxaad xaq u leedahay nuqul warqada oo ah ogeysiiskan. Waxaa laga yaabaa inaad la xidhiidho diiwangeliyaha ama xafiiska gelinta. Waxa kale oo aad ka daabacan kartaa nuqul ah ogeysiiskan bogaga shabakadda internet ka ee: www.medicalcenter.osu.edu.

## Isbedelada Ogeysiiskan

Xaqbaan u leenahay inaan badalnno ogeysiiskan. Xaqbaan u leenahay inaan dib u hubinno ama badalno ogeysiiska u dhaqangalaya macluumaadka caafimaadka ee aanu kaa haynay iyo sidoo kale wixii macluumaad ah ee aanu helno mustaqbalka. Nuqulada hadda yaalla ee ogeysiiskan waxaa laga heli karaa goobaha diiwaangalinta ama qoridda bukaanka oo dhan. Ogeysiiskan waxaa kale oo lagu soo daabici doonaa shabakadda Internetka. Taariikhda dhaqangalka ee ogeysiiskan waxaa la gelin doonaa boga koowaad ee boga internetka.

## Cabashooyinka

Sistamka ama habka caafimaadka waxaa ka go'an dhowrista xuquuqahaaga dhowrsanaanta. Hadii aad aaminsan tahay in xuquuqahaaga dhowrsanaanta lagu xad-gudbay, kadib waxaa laga yaabaa inaad sistamka ama habka caafimaadka u fayl garayso cabasho adigoo la xidhiidhiya Waaxda Adeega Macaamiisha ururka cabashadaadu khusayso ama maamulaha xafiiska/kiliiniga aad adeega ka hesho.

Nambarrada aad kala soo xariirayso waa:

Cisbitaalada Jaamacada iyo kilinigyada:
(614) 293-8944

The Arthur G. James Cancer Hospital and
Richard J. Solove Research Institute:
(614) 293-8609

The Ohio State University Hospitals East:
(614) 257-3420

OSU & Harding Behavioral
Healthcare and Medicine:
(614) 293-3530

The Ohio State University Physicians, Inc.:
(614) 784-7806

Waxaa sidoo kale laga yaabaa inaad dacwad u faylgarayso Xafiiska U.S. ee Xuquuqda Rayidka ee Washington DC. Cabashooyinka oo dhan waa in qoraal lagu gudbiyaa.

**Cabasho aad gudbisay lagugu ciqaabi maayo.**